# SHARCIYADA WHITTIER ALLIANCE

## I. HAY'ADDA

### A. Xubnaha Ay Ka Kooban Tahay Hay'Adda

Qoraalkan oo dhan hay'adda waxaa loola jeedaa Whittier Alliance ("WA" ama "hay'adda"). Whittier Alliance waa hay'ad aan faa'iido doon aheyn oo lagu abuuray sharciga Minnesota ee 317A kana kooban xubnaha codka dhiiban kara, maamulayaasha , shaqaalaha iyo mutadawiciinta

### B. Xaafadda Whittier

Xaafadda Whittied waxa ay jurqraafi ahaan ku taalaa Magaalada Minneapolis waxaana xuduud u ah dhinaca koonfureed ee Wadada Franklin, galbeedka  wadada I-35W, dhinaca baraiga Wadada Lyndale iyo Waqooyiga Wadada Lake, ee magaalada Minneapolis

## II. QODOBKA II UJEEDADA IYO ARAGTIDA

Ujeedadeena: In la xaqiijiyo amaanka iyo ku noolaashaha iyada oo la fududeynayo, loo doodayo, lana ambaqaadayo nolol ka kooban dadka kala duwan ee deggan Xaafadda.

Aragtideena: Adeegsiga cududda dadka iyo maaliyadda, macluumaadka, iyo gargaarka farsamada casriga ah sidii si haboon loo gacan siin laha maamulku in ay maamulaan oo dhaqangeliyaan hawlgalka muwaadiniinta ka qeyb qaadanaya.

Waxaanu U Taaganahay:  In aan u doodno oo waxbarasho iyo adeegyada kale ee ay u baahan yihiin aan u fidino xaafadda Whittier.

## III. XUBNAHA

### A. Xuquuqda Xubnaha

WA waxa ay leedahay hal koox oo cod dhiiban karta.   Xubin kasta oo cod dhiiban karta oo dooneysa in ay ka qeyb qaadato WA oo ka soo baxda shuruudaha waxaa loo tixgelinayaa "xubin ka soo baxday" shuruudaha oo xaquuqda ay leeyihiin ka mid tahay:

1) Xaqa cod dhiibashada ee kulanka sanadlaha ah iyo kulamada kale ee la qabto ee cod lagu dhiibanayo.
2) Xaqa ka qeyb qaadashada maamulka iyo jagooyinka kala duwan ee xubnaha da'doodu tahay ama ka weyn tahay 18.

### B. Shuruudaha Xubin Ka Noqoshada

Qof kasta oo da'diisu tahay 5 sano ama ka weyn, oo ogol qodobada lagu aasaasay WA iyo sharciyada u degsan, oo ka soo baxa shuruudaha ku xusan halkan:

1) Degan Whittier; ama
2) hanti ku leh  Whittier, ama
3) Ganacsi ku leh Whittier

### C. Tirada Cod Dhiibashada

Xubin kasta hal (1) cod dhiibasho ayaa loo ogol yahay.   Inkasta oo laga yaabo in ay xubin ka soo bixi karto shuruudaha cod dhiibashada wax ka badan hal cod ama ay ku leeyihiin wax ka badan hal ganacsi ama hanti, xubintaas waxa ay dhiiban kartaa hal cod oo kaliya.

## D. Abuuritaanka Shuruudaha Cod Dhiibashada Xubnaha

Dhamaan xubnaha doonaya in ay codkooda ka dhiibtaan kulanka Whittier Alliance waa ay yihiin xubno diiwaan gashan.

## E. Xilliga

Xubinimada waxaa la codsan karaa mar kasta iyada oo lala si xiriirayo WA kulanka ka hor, ama kulamada xubnaha. Mulkiilayaasha Hantida ama Ganacsiga waxaa lagu dhiiri gelinayaa in ay is diiwaan geliyaan oo ka soo baxaan shuruudaha ay ku xirtay WA ka hor inta aan kulanka la qaban.

## F. Xubnaha Degganayaasha

Waxyaabaha la ogol yahay xubinimada waxaa ka mid ah:

1) Biilka, xisaab, ama codsashada adeegga oo taariikhdiisu tahay 30 maalmood gudahood ee:
   a. Telefoonka, TV ama internetka
   b. Qashinka, bulaacadda, korontada, gaaska ama biyaha
   c. Bangiga ama kaararka bangiga
   d. Kirada ama deynta guryaha
2) Aqoonsi sawir leh oo ku qoran magaca iyo cinwaanka xaafadda Whittier, nooc kasta oo aqoonsi ah, haddii uu ahaan lahaa mid dawladdu bixisay, kuliyadaha, ama deganaashaha.
3) Heshiiska kirada ee xilligan ama heshiis kiro uu qof kale kaaga sii ijaaray oo qodobadiisu ay cadeynayaan taariikhda codeynta.
4) Aqoonsiyada la xiriira guryaha ardayda loo fidiyo.
5) Heshiiska bixinta kirada ee qolo sadexaad.
   a. Haddii aadan horey u cadeyn in aad ka soo baxday shuruudaha Whittier Alliance oo aadan heysan mid ka mid ah aqoonsiyada kor ku xusan, qof ka diiwaan gashan Whittier Alliance (oo ay ka mid yihiin xubin ka diiwaan gashan) ayaa kuu raaci kara kulanka xubnaha ama xafiiska Whittier si uu u xaqiijiyo in aad degan tahay xaafadda. Taas waxaa lagu magacaabaa “cadeyn.” Xubin diiwaan gashan waxa uu cadeyn u noqon karaa ilaa laba xubnood. Qof kale cadeyn uma noqon kartid haddii adiga horey cadeyn laguugu noqday.
   b. Horay isu diiwaan gelinta ee xaafadda Whittier.
      i. Haddii aad xaafadda iska diiwaan gelisay laakiin aad bedelatay magaca ama aad u guurtay meel isla xaafadda ah, waxa aad u baahan tahay in aad u sheegto magacaagii hore ama cinwaanka. Haddii aadan helikarin cinwaankii aad horey u daganeyd, laguuma ogolaanayo in aad codeyso ilaa aad dib u soo ceshato xubinimadaada. Xubnaha waxaa laga doonayaa in ay la yimaadaan cadeyn in ay ka soo baxeen shuruudaha codeynta dambe.
   c. Nooc kasta oo cadeyn ah oo uu ogol yahay Gudiga Doorashada Ee Minnesota ee aan halkan lagu xusin waa mid la ogol yahay.

Aqoonsiga aad keento waa inuu ku qoran yahay magaca sadexan ee xubinta iyo cinwaanka Whittier. Aqoonsiga laguna soo bandhigi karo qalab elektaroonig ah.

## G. Mulkiilayaasha Guryaha

Si loo xaqiijiyo in xubintu ka soo baxday shuruudaha :

1) Waa in mulkiiluhu keenaa aqoonsi cedeynaya mulkiyadda kuna qoran yahay cinwaanka Whittier and magaca canshuurta guriga lagu bixiyo.

## H. Mulkiilayaasha Ganacsiga

Goob kasta oo ganacsi (ha ahaato mid faa'iido doon ah ama mid aan aheyn) waxa ay dhiiban kartaa hal cod iyada oo aan loo eegin tirada mulkiilayaasha, dhismaha, ama hay'adda iska leh ee Whittier.

Shuruudaha ku xiran cod dhiibashada:

1) Waa in mulkiiluhu keenaa aqoonsi cadeynaya mulkiyadda oo uu ku qoran yahay magaciisa, cinwaanka ganacsiga ee Whittier, iyo magaca buuxa ee ganacsiga.
   Aqoonsiyada la ogol yahay waxaa ka mid ah:
   a. Shahaadada Xoghayaha Gobolka oo dhaqangal ah; ama,
   b. Leesinka ganacsiga ee Magaalada Minneapolis oo dhaqangal ah;ama,
   c. Biila korontada ama biyaha ee u dambeeyey; ama,
   d. Warbixinta bangiga ee u dambeysay, ama,
   e. Warqadaha ganacsiga ee laga diiwaangeliyey xoghayaha gobolka

Is diiwaangelinta ma dhameystirna ilaa wakiilka Whittier Alliance idinkugu soo diro iimeyl xaqiijin ah, boostada ama gacanta la idinka siiyo qoraal cadeynaya in la xaqiijiyey oo aad ka soo bixdeen shuruudaha.

1. Wakiilka Ganacsiga:
   a. Xaqa wakiil ka noqoshada: Mulkiilaha dhismaha ama goobta ganacsiga (mid faa'iido doon ah ama mid aan aheyn) oo ka soo baxday shuruudaha cod dhiibashada ee Whittier Alliance waxa ay magacaabi kartaa wakiil ka qeyb qaata cod dhiibashada.
   b. Qodobada ku xiran wakiilashada: Si aad u magacwoodo wakiil codkaaga kaaga wakiil ah:
      (i) Qof loo wakiishay waa inuu la yimaadaa aqoonsi sawir leh ee gobolka oo magaciisa iyo sawirkiisa ka muuqdaan; iyo,
      (ii) Wakiilasho ku qoran warqad xambaarsan magaca ganacsiga oo uu saxiixay mulkiilaha ama maamulaha ganacsiga una wakiilanayo inuu matalo ganacsigooda; iyo,
      (iii) Cadeyn muujineysa xiriirka uu la leeyahay mulkiilaha dhismaha ama ganacsiga.
   c. Dib U Eegista Aqoonsiga: Qoraalada waa in gacanta laga saaraa, iimeyl loogu soo diraa, ama la keenaa kulanka Whittier Alliance ee la doonayo in wakiilku codkiisa ka dhiibto. Haddii ganacsiga ama hay'addu aysan weli laheyn xaqa cod dhiibashada, waa in shaqaalaha Whittier Alliance ay ka xaqiijiyaan ganacsiga barta internetka ka hor inta aan wakiilka loo ogolaan inuu u codeeyo ganacsiga ama wakiil uga noqdo kulanka.
   d. Hal Mulkiile, Hal Cod: Mulkiilaha waxaa loo ogol yahay hal cod iyada oo aan loo eegin inuu degan yahay iyo in kale, ama tirada ganacsi ama hanti uu ku leeyahay xaafadda. Mulkiilaha goobta ganacsiga waxa uu sameysan karaa wakiil u codeeya. Wakiil aad magacoowdo looma adeegsado in lagu helo xuquuq codeyn oo dheeraad ah.

## I. Diiwaanka Xubnaha Cod Dhiibashada

Liiska xubnaha deganayaasha, ganacsiga iyo mulkiilayaasha oo horey loogu ogolaaday in ay codeyn karaan waxa lagu heynayaa xafiiska Whittier Alliance iyada oo la keenayo kulanka.

## J. Xafladda Codeynta

Marka la xaqiijiyo xubnaha codeyn kara, waa in codeyntu dhacdaa sida ugu dhaqsaha badan. Xubinimada waxaa ka mid ah cod dhiibashada Kulanka Whittier Alliance, Kulanka Sanadlaha Ah, Kulanka Gaarka Ahee xubnaha, iyo doorashada xubnaha iyo gudoomiyaha Gudiga.

### K. Xubinimada Ma Aha Mid La Wareejin Karo

Xubinimada iyo faa'oodyinka laga helo xubinimada ma aha mid la wareejin karo.

### L. Lacagta Xubinimada

Xubnaha wax lacag ah lagama doonayo.

### M. Ka Noqoshada Xubinimada

Xubinamadu way dhamaaneysaa xubintu aanay ka soo bixin shuruudaha xubinimada ee WA ama shuruudaha wakiilka noqoshada xubnaha.

## IV. KULANKA XUBNAHA

### A. Is diiwaan gelinta xubinta

Xubin kasta ee ka qeyb qaadaneysa dhamaan kulamada Whittier Alliance waa in ay is diiwaan geliyaan.

### B. Noocyada Kulanka Xubnaha

#### 1. Kulamada Gudiyada

Kulamada gudiyada waxaa la qabtaa ugu yaraan sadexdii biloodba hal mar taariikhda iyo waqtiga gudigu isla garto (oo ay ka mid tahay telefoonka ama iyada oo meel la kala joogo). Waa in ay kulanka ka qeyb qaataan ugu yaraan toban (10) xubnood oo ka soo baxay shuruudaha codeynta ama qoraal ahaan uga qeyb gala.

#### 2. Kulanka Sanadlaha Ah

Kulanka sanadlaha ah ee xubnaha waxaa la qabtaa sanad kasta taariikhda iyo waqtiga gudiga maamulku isla garto. Si uu kulanku u noqdo mid taabogal ah, waa in ay goobjoog yihiin ugu yaraan konton (50) xubnood oo xaq u leh in ay codeyn karaan oo la xaqiijiyey. Xubin kasta oo xaq u leh hal (1) cod oo ay ku dhiiban karaan hal (1) cod kulan kasta oo u furan xubnaha.

<u>Ajeendaha Kulanka Sanadlaha Ah:</u>

a. Xubnaha la magacaabayo oo lagaga dhawaaqo golaha.
b. Saraakiisha gudoomiyayaasha gudiyada waxa ay soo bandhigaan dhaqdhaqaaqa iyo arrimaha maaliyadda ee hay'adda.
c. Magacaabis kasta waxaa ku dhawaaqa oo baaritaan ku sameeya shaqaalaha.
d. Xubnaha u sharaxan maamulka ayaa la soo bandhigaa.
e. Gudiyada Ku Meel Gaarka Ah ee maamulka ayaa la isku raacaa.
f. Wixii kale ee u baahan in xubnuhu ka codeeyaan la qabtaa.
g. Codeynta ayaa bilaabata.

<u>Nidaamka Cod Dhiibashada ee Kulanka Sanadlaha Ah</u>

a. Cod dhiibashada sanadlaha ah waxaa loo qaadaa hab la isku dhafayo kordhinta ka qeyb qaadashada xubnaha oo ay ka mid tahay in looga qeyb qaadan karo hab elektaroonik ah, qof ahaan, ama telefoonka. Codeynta waxaa la qabanayaa waqti ku dhow bandhigga ay sameeyaan musharaxiinta.
b. Codeyntu waa mid furan ugu yaraan muddo toodoba cisho ah ee maalmaha shaqada.
c. 5ta galabnimo ee maalinta ugu dambeysa codeynta, maamulayaasha ayaa ku dhawaaqaya oo soo dhaweeya xubnaha la doortay una ogolaada in ay ka qeyb qaataan kulanka guriga maamulka. Wixii kale ee lagu soo bandhigo kulanka sanadlaha ah ee codeynta xubnaha waxa ay u baahan tahay oo kaliya cod dhiibasho kooban.

Natiijada doorashada iyo waxyaabaha kale ee xubnuhu ka codeeyeen kulanka waxaa lagu dhawaaqayaa iyada oo qeyb ka ah maamulka sanadlaha ah.

3. **Nidaamka Gudiyada & Kulanka Gaarka Ah ee xubnaha**

Madaxa Gudiga ayaa ku dhawaaqa kulanka gaarka ah ee xubnaha sida ay isugu raacaan Xubnaha Gudiga Maamulka, ama codsi qoraal ah ay soo gudbiyaan ugu yaraan konton (50) xubnood, xubinmadooda la xaqiijiyey. Codka Gudiga Maamulka ama codsiga xubnaha waa in lagu cadeeyaa ujeedada kulanka gaarka ah. Ujeedada kulanka gaarka ah waa in waafaqsan tahay xuquuqda xubnaha. Sharci ahaan, looma qaban karo loogamana hadli karo kulanka gaar ah wax ka baxsan qodobadaku qoran ogeysiiska kulanka. Tirada ugu yar ee xubnaha loo baahan yahay in ay goobjoog ka noqdaan kulan waa konton (50) xubnood oo xubinamadooda ay xaaqiijiyeen gudiga maamulka.

<u>Nidaamka Cod Dhiibashada ee Kulanka Gaarka Ah:</u>

Cod dhiibashada kulanka gaarka ah waa mid la mid ah cod dhiibashada kulanka sanadlaha ah.

### C. Ogeysiiska Xubnaha

Ogeysiis Rasmi ah oo ku saabsan kulanka guud ee xubnaha ayaa la gaarsiinayaa iyada oo qoraal ah dhamaan xubnaha ugu yaraan shan iyo toban (15) cisho, laakiin aan ka badneyn sodon (30) cisho, ka hor inta aan laqaban kulanka kaasoo lagu cadeeyo waqtiga, goobta iyo ajandaha kulanka.

Ogeysiiska rasmiga ah waxaa ka mid noqon kara qeyb ahaan ama dhamaan qodobada soo socda (waxaana ka mid noqonaya waxa aan ka yareyn sadex (3) hab): In lagu daabaco ogeysiiska wargeys gaara xaafadda Whittier, boostada loo dhigo, warqad lagu daabaco oo si wanaagsan loo dadaalo in la gaarsiiyo xaafadda Whittier. Waxaa la idinku dhiirigelinayaa gaarsiin dheeraad ah oo ka baxsan tan rasmiga ah.

### D. Goobta iyo Habka Kulanka Xubnaha

Kulamada waxaa loo qaban karaa fool ka fool ama iyada oo meel fog la kala joogo. Kulanka Xubnaha waxaa lagu qaban karaa meel kasta oo dadka naafada (ADA) ah soo gaari karaan ee ka tirsan xaafadda Whittier sida ay u go’aamiyaan Gudiga Maamulka.

### E. Kulanka Xubnaha Leh Xuquuqda Cod Dhiibashada

1. Qaraar laga saaro ama qodob la isla ogolaado kulamada oo dhan waa mid ku xiran halka uu u bato xubnaha ka qeyb qaadanaya ee leh xaqa cod dhiibashada haddii aysan sidaas si ka duwan aanay dhigeyn sharciyada hay’adda.
2. Kaararka cod bixinta ayaa la adeegsan karaa kulamada. Cod dhiibasho qoraal ah waxaa la adeegsan karaa haddii ay xubin codsato.
3. Qof inuu u codeeyo qof kale lama ogola.

### F. Nidaamka Cabashada Xubnaha

Gudiga Maamulka ayaa maamulaya xalinta cabashooyinka xubnaha si xal looga gaaro (arrimaha aan aheyn cabashada shaqaalaha/ maareynta cududa shaqaalaha)

## V. GUDIGA MAAMULKA

### A. Hawsha Gudiga Maamulka

Gudiga Maamulka ayaa maamula hantida iyo hawlaha hay’adda. Gudiga ayaa maamula kulamada, hawlaha, iyo arrimaha kale isaga oo go’aan ka gaara qorsheynta iyo nidaamka ay ku shaqeyso

hay'adda.   Maamulka ayaa hawshiisu tahay mas'uuliyadda, daacad u ahaashaha iyo u hogaansanaanta.

- Mas'uuliyadda waxaa hoos imanaya in maamuluhu leeyahay aqoonta oo la yimaado daryeelka uu qof kasta oo caadi ah la imaan lahaa xalaadaas oo kale.
- Daacad u ahaanshaha waxaa soo hoos galaya in maamulku daacad u ahaado danta hay'adda iyo xubnaheeda.
- U hogaansanaanta waxaa soo hoos galaya in maamulku uu u dhaqmo sida ay dhigayaan sharciyada hay'adda, nidaamka u degsan iyo qodobada kale ee lagu maamulo iyo sidoo kale sharciyada kale ee lagu dhaqo.

Xubnaha gudiga waxaa waajib ku ah in ay xilkaas u gutaan oo danta hay'adda ka hor mariyaan wax walba.  U adeegid si mas'uuliyad ku dhisan waxaa ka mid ah in ay codkooda ka dhiibtaan arrimaha oo dhan haddii aan Maamulaha laga reebin maslaxad iska hor imanaysa darteed. Maamulku waa inuu soo bandhigaa haddii ay jiraan maslaxado iska hor imanaya oo ay ka gaabsadaan doodaha iyo cod dhiibashada marka ay jirto ama loo arki karo in dan gaar ugu jirto natiijada (akhri nidaamka maslaxadaha iska hor imaanaya).   In aad ka aamustaan cod dhiibashada lama ogola.

## B. Awoodaha Guud

Iyada oo la raacayo sharciyada lagu maamulo hay'adaha aan faa'iido doonka aheyn, Gudiga Maamulku waxa uu u xil saran yahay mas'uuliyadaha isago oo leh awoodda muhimka ah ee mamulka WA sida uu dhigayo Minn. Stat.  317A iyo Sharciyada IRS, oo ay ka mid yihiin laakiin aan ku koobneyn kuwa soo socda:

1. Maamulka hay'adda iyaga oo dajiya sharciyada iyo nidaamka guud ee ay ku shaqeyso.
2. Shaqaaleynta, shaqo ka saaridda, abaalmarinta iyo la socoshada wax qabadka xubnaha maamulka sare.
3. La socoshada arrimaha maamliyadda ee hay'adda.
4. Ogolaashaha miisaniyad sanadeedka hay'adda.
5. U hogaansanaanta qorshaha istaraatiijiyadda iyo ujeedada.
6. In ay ka wada shaqeeyaan danta WA maka ay gudanayaan xilka iyo mas'uuliyadda ay qaadeen ee looga shaqynayo fayo qabka hay'adda iyo danta guud ee WA.
7. In Madaxda, saraakiisha, wakiilada iyo qandaraaslayaasha ay ka madax banaan yihiin sheegada loo heysto ama dhaawac soo gaaray qof hawshaas gudanaya ama ka dhasha hawsha uu qofku u xil saaran yahay ama leh ujeedo ceymis.
8. Fulinta Nidaamka, Sharciyada, iyo Habka U degsan WA.
9. Gudigu Maamulku waa inuu la yimaadaa talaabooyin uu ugu adeegayo sida ay ku jirto danta WA oo aysan jabin sharciyada Minnesota, gaar ahaan Qodobada  309, 317A, 501B, iyo kuwa dawladda dhexe.    Qof ka tirsan kuma yeelan karo xuquuq, ama mulkiyada WA. Maamulayaashu ma yeelan karaan cod dheeraad ah.

## C. Shuruudaha Xubnaha Maamulka

Xubin kasta oo ka tirsan gudiga maamulka waa inuu:

1. Ka soo baxaa shuruudaha xubinimada
2. In aad ka qeyb qaadato dhacdooyinka ay marti galiso Whittier Alliance, kulamada iyo hawlaha, kulanka qof ahaaneed ee Gudiga Maamulka ee Whittier Alliance, mudada 12ka bilood ee Kulanka Sanadlaha ah.  (Taas waxaa lagu soo bandhigi karaa warqadda la

saxiixo bilowga kulanka, sawirada laga qaado kulanka, ama Kulanka Gudiga Maamulka ama ka qeyb galka kulanka cadeynta deganaashaha ee xubnaha).

3. In aad taageerto ujeedooyinka canshuur dhaafka iyo hawlgalka hay'adda.
4. In aad qof ay da'diisu ka weyn tahay 18 jir.
5. Aan horey ula imaan talaabo liddi ku ah hay'adda ama aan cadaawad u heyn hay'adda sida ay tilmaameen gudiga maamulka. In aad naqdin ku sameyn karto hay'adda ama aad gacan ka geysato nidaamka xalinta khilaafaadka ee doonayo in lagu horumariyo hay'adda.

## D. Tirada iyo Xubnaha Uu ka Kooban Yahay

Gudiga Maamulku waxa uu ka kooban yahay sida soo socota:

1. Xubnaha Joogtada – 12 xubnood
2. Xubnaha Wakiilada Ganacsiga/Mulkiilayaasha Dhismayaasha - 3 xubnood (ugu yaraan 1 xubin faa'iido doonka iyo 1 xubin hay'adaha aan faa'iido doonka aheyn)
3. Madaxda Gudiyada Ku Meel gaarka Ah - kala duwan

## E. Mudada Gudiga

1. Xubnaha Joogtada ah - 4 ka mid 12 ka xubnood waxaa la dooranayaa sanad kasta si loo ilaaliyo qodobada u dhigan iyo joogteynta qaab dhismeedka gudiga. 4ta musharax ee hela codka ugu badan kulanka sanadlaha ah ayaa ku guuleysanaya. Maamule kasta waxa uu xilka heynayaa muddo 3 sano ah. Taasi waxa ay dhalineysaa fursad in mar kasta ay xilka hayaan 12 xubnood.
2. Wakiilada Ganacsiga/Mulkiilayaasha - waxa uu mid kasta dooranayaa 3 xubnood sanadkiiba ee kulanka sanadlaha ah. Hay'adaha faa'iido doonka ah iyo kuwa aan faa'iido doonka aheyn ee hela codka ugu badan sida ay u kala horeeyaan, ayaa buuxinaya jagooyinka. Kursiga sadexaad waxaa buuxinaya xubnaha hela codka ugu badan dhinac kasta kuwaas oo ku xiga xubnaha hela codka ugu badan dhinac kasta Maamule kasta waxa uu xilka heynayaa muddo 1 sano ah. Mulkiilaha hantida, haddii aanu heysan canshuur dhaaf, waxaa loo tixgelinayaa faa'iido doon.

   Gudoomiyayaasha Gudiyada Ku Meel Gaarka Ah – Gudoomiyayaasha oo dhan waxaa doorta xubnaha gudiga kulanka ugu horeeya ee ku xiga kulanka sanadlaha ah. Haddii la abuuro Guddi Cusub oo ku meel gaar ah, Gudoomiyaha gudiga waxaa lagu dooranayaa kulanka xiga ee loo qabto arrintaas 90 maalmood ee soo socda gudahood markii la qabtay Kulanka Sanadlaha Ah, iyada oo faahfaahinta kulanka loo soo gudbin doono xubnaha.
3. Gudoomiye kasta waxa uu xilka heynayaa muddo 1 sano ah.

Xad u go'an ma jiro inta ay ku eg tahay xubanimada Maamule, marka laga reebo in xubin aanu wax ka badan 6 sano oo xiriir ah aanu kursiga heyn karin haddii aanu u dhexeysiin 1 sano.

## F. Doorashada Gudiga

Gudiga ayaa ku dhawaaqaya qabashada codsiyada ka hor kulanka sanadlaha ah ama kulanka gaarka ah, hadba kan ay khuseyso.

Xubin kasta oo leh xaqa codeynta way u tartami kartaa xubin ka noqoshada gudiga Maamulka:

1) Ka jawaabidda soo gudbinta codsiyada xubnaha;

2) Soo gudbinta codsiga xilliga iyo sida ay ku dhawaaqeen Gudiga Maamulka in loo soo gudbin karo Kulanka Sanadlaha Ah ama Kulanka Gaarka Ah ee lagu sheegay ujeedada kulanka gaarka ah,ama,
3) La xaqiijiyey inuu ka soo baxay shuruudaha maalinta doorashada.

Codsigu waa inuu noqdaa mid qoraal ah waana in ay ku cad yihiin magaca, cinwaanka, iyo cadeynta musharaxa.

Gudiga Maamulka ama shaqaalaha WA ayaa qabanaya dhamaan codsiyada, go'aan ka gaaraya in codase kasta xubin ka noqon karo guriga oo iyo in uu ka soo baxay shuruuudaha, iyo qodobada looga baahan yahay si u qaado mas'uuliyadda. Gudiga ayaa diyaarinaya kaararka codeynta. Qabashada codsiyada waxa ay ku eg tahay marka la furo kulanka sanadlaha ah.

## G. Xubnaha Uu Ka Kooban Yahay Gudiga

Maamulayaasha wax lacag laguma siinayo adeegga ay qabanayaan. Ma jiro maamule lacag ama magdhaw kale lagu siinayo hawsha ay qabanayaaan ee maamulka, xirfadaha, iyo adeegga kale ee ay u qabtaan hay'adda.

1. Maamulayaasha waxaa laga yaabaa in loo celiyo wixii kharash ah ee jeebkooda kaga baxa kaasoo mid horey loogu ogolaaday.
2. Si looga digtoonaado saameynta dadweynaha ee tooska ah ama dadban ee nidaamka u degsan WA iyo in ay u ekaadaan kuwo dantooda gaarka ah, maamulayaasha kama raadsan karaan shaqaaleyn ama qandaraas Whittier Alliance sanad gudihiis marka ay ka tagaan xubinimada haddii aanay taas ogolaan 2/3 xubnaha gudiga maamulka.

## H. Xilka Ka Qaadista Xubinta Maamulka

1. Xil ka qaadis toos ah:

   Maamulaha waa laga qaadayaa xilka si toos ah haddii la ogaado inuusan xubin la aheyn hay'adda.

2. Xil ka qaadis ku dhisan ka maqnaashaha:

   Xubin kasta oo ka tirsan gudiga maamulka waa laga qaadayaa xilka si toos ah haddii ay ka maqnaadaan cudurdaar la'aan 2 kulan oo kulamaga Gudiga ah muddo sanad ah Kulanka Sanadlaha Ah ka dib. Waxaa loo diiwaan gelinayaa maqnaasho haddii ay xubintu ka maqnaato 1/3 kulnka gudiga maamulka. Ka saaridda waa mid dhaqangal ah kulanka xiga ee gudiga maamulka ee bisha ah.

3. Maqnaasho Cudurdaar leh:

   Maamulayaashu waxa ay maqnaasho aan cudurdaar laheyn u bedeli karaan mid cudurdaar leh marka ay shaqeeyaan saacado mutadawacnimo ah.

   a. Xisaabinta: 2 saacadood oo mutadawacnimo ah waxa ay u dhigantaa 1 saac oo kulanka gudiga maamulka oo aad ka maqneyd. Tusaale ahaan, kulanka maamulka oo qaatay 2 sacaadood waxaa loogu bedeli karaa maqnaasho cudurdaar leh 4 saacadood oo mutadawicnimo la ogol yahay ah.
   b. Mudada: Saacadaha mudatawacnimada waa in lagu dhameeyaa 30 cisho gudahood ee kulanka (horey loo ogolaaday ama ka dib marka aad ka maqnaatay kulanka).
   c. Ogolaashaha: Saacada mutadawicnimada waxaa ogolaanaya Gudiga Fulinta.
   d. Saacadaha Shaqada ee La Ogol Yahay: Hawlaha la xiriira taageerada loo baahan yahay oo ay loo soo bandhigay oo ay ogolaadeen Gudiga Fulinta ama Gudoomiyaha Fulinta. Taas waxaa ka mid noqon kara laakiin aan ku koobneyn

booqashada bulshada, wacyi gelinta bulshada, ka shaqeynta xafladaha WA, ka qeyb qaadashada lacag ururinta, hawalaha xafiiska, iwm.

e. Xaddidaada: 3 maqnaasho oo cudurdaar leh ayaa loo ogol yahay hal sano oo ka bilaabanaya kulanka ugu horeeya ee sanadlaha ah.

4. Racfaan ka qaadashada xil ka qaadis ku dhisan ka maqnaashaha:

   Marka uu dhaqan galo xil ka qaadista, Maamulaha laga qaaday xilka waxa uu ka qaadan karaa racfaan qoraal una soo gudbin karaa xubin kasta oo ka tirsan gudiga maamulka. Racfaanka waa inuu noqdaa qoraal soona gaaraa ugu yaraan 24saac ka hor inta aan la qaban kulanka Gudiga Maamulka ee ka dambeeya kulanka xilka looga qaaday. Gudigu waxa uu cod u qaadayaa in maamulaha xilka laga qaaday dib loo soo celiyo iyada oo cod hal dheeri ah.

5. Xilka Looga Qaaday Go'aanka Gudiga:

   Xubin kasta waa laga qaadi karaa xafiiska, sabab iyo sabab la'aan, cod laba meel oo sadex meel ee Gudiga Maamulka ee kulanka caadiga ama kulanka gaarka ah ee la isugu yeero xubnaha ujeedadaas. Xubinta xilka laga qaaday waa in la siiyaa ogeysiiska qoraal ah marka laga qaado talaabada noocaas ah oo uu xaq u leeyahay inuu ka hadlo kulanka. Xubinta maamulka ee u taagan in xilka laga qaado looma ogola cod dhiibasho.

6. Ogeysiinta:

   Gudiga ayaa ogeysiinaya in xubinya Maamulka laga qaaday kaasoo loogu dirayo cinwaankii ugu dambeeyey ee u diiwaan gashan .

## I. Is Casilaadda Xubnaha Gudiga

Xubin ka tirsan gudiga Maamulka waa iska casili karaa markii uu doono iyada oo qoraal ah isaga oo u soo gudbiya Gudiga Maamulka ama Madaxa Gudiga Maamulka. Ogeysiiska waxa uu noqon karaa mid qoraal ah. Is casilaaddu waa mid dhaqan ah marka ugu horeysa ee ay soo gaarto haddii aan taariikh kale lagu qorin warqadda loo diray Gudiga.

## J. Jagooyinka Banaan ee Gudiga

Haddii ay dhacdo in xubin ka tirsan uu ka tago maamulka taasoo ay ugu wacan tahay geeri, ama xilka laga qaado, Gudigu waxa uu dooran karaa qof bedela oo laga soo xulayo darajada ay xubintaasi mataleysay mudada ka hartay xilliga xubintaas.

1. Magacaabista Gudiyada: Xubnaha gudiyada waxaa laga soo xulayaa xubnaha leh cod dhiibashada ee hay'adda. Gudiga ama Shaqaalaha WA waxaa loo soo gudbiyaa Gudiga oo go'aan ka gaara in xubinta la magacaabay ay ka soo baxday shuruudaha, leeyahay shuruudaha iyo sida uu u qaban kaaro hawsha gudiga.
2. Doorashada: Xubnaha ugu dambeynta ee lagu taliyo ee Gudiga Magacaabista ayaa loo diraa Gudiga Maamulka si ay ugu codeeyaan. Gudiga ayaa cod u qaada si ay u doortaan xubin ku meel gaar ah cod hal dheeri ah.
3. Xilliga:
   a. Xubnaha Rasmiga Ah: Haddii ay jago banaanaato iyada oo sanad ka hartay dhamaadka mudada jagada Xubnaha Rasmiga Ah, jagadaas lama buuxinayo ilaa xilliga cod dhiibashada ee Kulanka Sanadlaha Ah.
   b. Maamulayaasha Wakiilada Ganacsiga/Mulkiilayaasha Dhismayaasha: Haddii ay jagadu banaananto sanadka ugu horeeya ee Wakiilka Ganacsiga/Mulkiilayaasha Hantida, ka dib waxa uu go'aanku noqonayaa in jagada la buuxiyo iyo in kale ama aan la buuxin ilaa Kulanka Sanadlaha taasoo loo daayo Gudiga Magacaabista taasoo ku xiran in jagadu tahay mid ay mudadeedu ku eg tahay 1 sano.
   c. Gudoomiyaha Gudiyada: Haddii ay jagada banaan tahay doorka gudoomiyaha gudiga, xubnaha ku haboon gudiga waxaa dooran kara gudoomiyayaasha cusub ee ka soo baxa shuruudaha si uu u dhameystiro mudada hartay.

# VI. KULANKA GUDIGA MAAMULKA

## A. Kulanka Gudiga Maamulka ee Caadiga Ah

Gudiga maamulku waxa ay kulmaan bilkasta ugu yaraan 11 jeer sanadkii. Mid ka mid ah kulmadan waxa uu ku dhacaa kulanka sanadlaha ah. Kulamadan caadiga ah waxaa la qabtaa xiliga iyo goob ka tirsan Xaafadda Whittier ama barta internetka (ama isu geynta labadaba) lagu cadeeyo go'aanka Gudiga Maamulka. Gudigu waxa uu kulanku fool ka foolka ah ku qabanayaa goob ay dadka naafada ah soo gaari karaan.

## B. Kulanka Sanadlaha Ah

Gudiga Maamulku waxa ay kulan sanadle ah sanad kasta u qabanayaan xubnaha.

## C. Kulanka Gaarka ee Gudiga Maamulka

Waxaa laga yaabaa in uu kulan gaar ah ku dhawaaqo Gudoomiyaha Gudiga Maamulka , ama ay codsadaan xubnaha Maamulka intooda badan, ama xubnaha Gudiga Fulinta intooda badan.

## D. Ogeysiiska Gudiga

Ogeysiis qoraal (sida mid electroonik ahaan la isugu soo diro, boostada la soo dhigo, ama agendaha gudiga) ee kulamada caadiga ah ayaa loo qeybinayaa dhamaan xubnaha maamulka ugu yaraan shan maalmood ama aan ka badneyn 30 maalmood ka hor xilliga la qabanayo kulanka.

Ogeysiis qoraal ah nooc kasta oo kulan gaar ah oo la qabanayo waxaa la soo gaarsiinayaa dhamaan xubnaha gudiga ugu yaraan 48 saacadood ka hor xilliga kulanka.

Ogeysiiska kor ku xusan ee kulamada gudiga haddii ay uu ogolaado mid ka mid ah in meesha laga saaro. Xubinta maamulka marka uu yimaado kulanka waxaa loo qadayaa inuu ka haray in ogeysiis ahaan loogu soo diro (haddii aanu horey u gaarin).

## E. Tirada La Doonayo & Cod Dhiibashada

Tirada loo baahnaa in kulanku ku bilowdo waa tirada ugu yar ee ku codeyn karta cod hal dheeri ah.

Tirada ugu yar waa in ay noqotaa mid joogta ah inta uu kulanku socdo oo dhan.

Marka tiradu buuxsanto, waxaa loo baahan yahay in fariin lagu daro cod qaadis ah oo lagu codeeyo cod hal dheeri ah ee xubnaha ee Maamulka ee goobjooga ah shirka.

### F. Ka Qeyb Galka Kulanka Iyada Oo Meel Fog La Kala Joogo

Sida uu ogol yahay sharciga gobolka, kulanka waxaa qeyb ahaan ama asaga oo dhan lagu qaban karaa iyada meel fog la kala joogo, haddii la isla garto. Habka isgaarsiinta ee meel fog la kala joogo waa inuu ogolaanayo dhamaan xubnaha ka qeyb qaadan karaan shirka. Xubnaha Gudigu waxa ay kaga qeyb geli karaan telefoon, kombiyuutarka, ama fool ka fool.

### G. Talaabada Qoraalka ee Gudiga Iyada Oo Aan Kulan La Isugu Iman

Sida sharcigu ogol yahay, talaabo kasta oo uu qaado ama uu ogolaado Gudiga Maamulka inta uu socdo kulanka waa in laga dhigaa qoraal oo la saxiixaa ama lagu ogolaadaa habka elektaroonigga ah (sida cod dhiibashada iimeylka, barta internetka ama faakis), xubnaha gudiga maamulka ayaa laga doonayaa in ay qaadaan talaabadan iyada oo xubnaha oo dhan ay goobjoog ka yihiin.

## VII. Saraakiisha Gudiga Maamulka

### A. Saraakiisha

Saraakiisha hay'adda waxaa ka mid ah Gudoomiyaha, Gudoomiye ku xigeenka, Xogheynta iyo Qasnad hayaha. Marka laga reebo halka Sharcigu ku xusay, Gudiga maamulka ayaa leh awooda magacaabidda iyo xilka saraakiisha. Ma jiro qof laba jago isku mar qaban kara.

### B. Doorashada Saraakiisha Iyo Qodobada

Gudiga ayaa saraakiisha ka dooranaya xubnaha maamulka kulanka ugu horeeya ee Gudiga ee ku xiga kulanka sanadlaha ah.

Saraakiishu waxa ay hawshoodu ku egtahay muddo 1 sano ah ilaa Kulanka Sanadlaha ah ee xiga ama ilaa ay iska xasilaan, laga qaado saraakisha ama ay waayaan xubunimada. Saraakiisha la doorta bartamaha mudada waxa ay xilka heynayaan inta ka hartay Kulanka Sanadlaha ee xiga.

Haddii ay dhacdo in mudada Gudoomiyaha gudiga ay dhamaato oo aanan lagu dooran Kulanka sanadlaha Ah, Gudmoomiyaha xiligiisa dhamaaday ayaa si ku meel gaar ah u magaacabaya gudoomiye ilaa koox fulineed la dooro kulanka ugu horeeya ee gudiga.

### C. Shaqo Ka Saaridda Saraakiisha

Sarkaalka laga saaro shaqada, sabab iyo sabab la'aan, kulan kasta oo uu qabto Gudigu waa in loo qaadaa cod hal dheeri ah oo dhamaan xubnaha Maamulku goob joog yihiin. Sarkaalka waxaa loo dirayaa ogeysiis qoraal ah muddo 15 cisho ka hor inta aan go'aan la gaarin talaabada la qaadayo xaqna waxa uu u leeyahay in dhiniciisa la dhageysto.

### D. Jagooyinka Banaan ee Saraakiisha

Haddii ay banaanaato jagada saraakiisha oo ay ugu wacan tahay in shaqada laga saaray, geeri, is casilaadda ama shaqo ka eryid, Gudiga ayaa dooranaya oo u ogolaanaya inuu buuxiyo jagada Xubin kale oo Maamul mudada hartay.

## VIII. GUDIYADA GUDIGA MAAMULKA

### A. Gudiga Fulinta

Gudiga fulinta waxa uu ka kooban yahay afar sarkaal. Gudiga fulintu waxa ay kulmaan hadba sida loogu baahdo ama codsiga inta badan ee xubnaha Gudiga Fulinta. Gudiga maamulka ayaa dajiya ajendaha kulanka gudiga oo talo u soo jeediya Gudiga qodobada la xiriira nidaamka maamulka.

### B. Gudiga Maaliyadda

Gudiga Maaliyadda waxa ay warbixin u soo diraan Gudiga iyaga oo ka soo warbixiya xaaladda dhaqaalaha iyo lacag ururinta ee hay'adda.    Qasnad hayaha ayaa madax u ah gudiga.

### C. Gudiyada Ku Meel Gaarka Ah

1. Abuuritaanka

   Kulanka sanadlaha ah ee Xubnaha hay'adda ayaa cod buuxa ku ogolaada, ka dib talo soo jeedinta Gudiga, gudiyada la abuuray ee Gudiyada Ku Meel Gaarka Ah ee sanadka soo socda.

2. Xubnaha iyo Kulamada

   Xubin ka noqoshada gudiyada ku meel gaarka ah waa mid u furan dhamaan xubnaha hay'adda.  Gudiyada Ku Meel Gaarka Ah waxa ay u kulmaan si joogta ah xilliga iyo goobta ay gudigu isku raacaan.

   Gudoomiyaha Gudiga Ku Meel Gaarka Ah ayaa mas'uulka ah inuu gacansaar la yeesho shaqaalaha oo dajiyo waqtiga, goobta iyo ajandaha oo qabto kulanka gudiga.

   Gudi kasta waxa uu leeyahay nidaam u gaar ah, oo Gudiga Maamulka ogolaaday, dhageysiga iyo qiimeynta talo soo jeedinta Gudiga Maamulka.

3. Gudoomiyaha Gudiga

   Gudoomiyaha Gudiga Ku Meel Gaarka Ah waa laga qaadi karaa xilka sabab iyo sabab la'aan ka dib marka uu u codeeyo Gudiga Maamulka

### D. Gudi Hoosaadyada/ Gudiyada Gaarka Ah

Markii muddo la joogaba waxa uu Gudiga Maamulku abuuraa gudiyo u xilsaaran hawlo kala duwan iyada oo ujeedadu tahay in ay qabtaan hawlo gaar ah ama wajahaan baahi gaar ah.

Gudoomiyayaasha gudiyadan xubin kama aha Gudiga Maamulka ilaa ay iyagu diyaar u yihiin in ay xubin ka noqdaan Gudiga maamulka oo ay maraan doorashada lagu doorto Kulanka Sanadlaha ah ama ay noqdaan Gudoomiyaha Gudiga.

## IX. Nidaamka Maslaxadaha Iska Hor Imaanaya

Whittier Alliance waxa uu dhaqan geliyey nidaam u degsan maslaxadaha iska hor imaanaya, taasoo nuqul ka mid ah laga diiwaan geliyey hay'adda.

## X. Diiwaanka IYO BUUGAAGTA

### A. Diiwaanada

Hay'addu waxa ay ku heyneysaa xafiiska u diiwaan gashan ama nidaamka diiwaan gelinta ee barta internetka iyada oo la buuxiyo nuqlada iyo qodobada, diiiwaanka xisaabaadka, heshiiska codeynta, iyo qoraalada kulamada, gudiga maamulka iyo gudiyada ama gudiyada hawlaha gaarka ah muddo lix sano ah.

### B. Hanti dhowrka

Hay'addu waa in ay u hogaansataa sharciyada gobolka iyo shuruudaha deeqda oo WA waajib kaga dhigaya dib u eegis sanadle ah, hanti dhowr, ama ay isugu u diyaarinta xisaabaadka hanti dhowrka.

### C. Sanad Maaliyadeed

Sanad maaliyadeedka hay'adda waa jadwal sanadeedka.

# XI. HEYB SOOC

Adeegga hay'adda ee bulshada waa mid aan la xadidin iyada oo la eegayo naafanimada, halka qof asal ahaan ka soo jeedo, midabka, asalka qofka, macluumaadka jinsiga, da'da, diinta, xaaladda guurka, doorashada jinsiga ama aqoonsiga, iyo xaallaada qaadshada gargaarka dadweynaha, qaxootinimada ama taariikhda fal dambiyeedka.

WA waxaa ay ku dadaaleysaa in ay gaarsiiso dhamaan dadweynaha oo dhan. Dhamaan Gudoomiyayaasha, adeegayaasha,ka qeyb galayaasha kulamada Whittier Alliance, waxa ay muhimmad siinayaan codka dadka laga tirada badan yahay, bulshada; ma dhiiri gelineyso mana u dul qaadaneyso heyb sooc, cabsi gelin, xadgudub jinsi, handadaad, qashqashaadda, ama faalo rabshad wehliso, ama luqad; waxaanu dooneynaa in aan xubnaha barno la dagaalanka heybsooca, sinaashaha iyo hab bulshada ku dhaqan xaafadaha Whittier si isku mid ah loo wajaho. .

# XII. WAX KA BEDELKA SHARCIYADA IYO QODOBADA

## A. Wax ka bedelka Go'aanka Gudiga

1. Gudiga Maamulka ayaa awood u leh in ay wax ka bedelaan Sharciyada marka laga reebo kuwa hoos lagu sheegay.
2. Sharciga la doonayo in wax laga bedelo waa in si qoraal ah loogu soo gudbiyaa Gudiga maamulka ugu yaraan 15 cisho ka hor xilliga kulanka looga doodayo wax ka bedelka qodobada.
3. Sharciga wax laga bedelayo waa in ay ogolaadaan 2/3 xubnaha kulanka caadiga ah ee Gudiga Maamulka ama kulanka gaarka ah ee la isgu yeeray ujeedadaas.

## B. Wax Ka Bedelka Talaabooyinka Xubnaha

1. Qeybaha hoos ku xusan waa wax ka bedel Sharciyada ay waajibku tahay in ay gudiga maamulku u codeeyaan.
   a. Qodobada saameynta ku yeelan kara shuruudaha ku xiran xubinimada ama go'aan ka gaarista xubinimada; ama,
   b. Qodobada saameynta ku yeelan kara tirada ugu yar ama codeynta ee kulamada xubnaha; ama,
   c. Qodobada saameynta ku yeelan kara tirada, doorashada, qodobada ama aqoonsigta looga baahan yahay xubnaha gudiga maamulka; ama,
   d. Qodobada faahfaahinta ka bixiya nidaamka shaqada looga saaro xubnaha gudiga maamulka ama buuxinta jagooyinka banaan.
2. Xubin kasta oo ka tirsan hay'adda waa uu soo jeedin karaa isbedel lagu sameeyo liiska kor ku qoran isaga oo u soo gudbiya Gudiga Maamulka codsi Kulan Gaar Ah. Kulanka Gaarka Ah waxaa ku dhawaaqaya Gudiga Maamulka oo soo saaraya ogeysiiska waxyaabaha laga doonayo.
3. Sharciga la doonayo in wax laga bedelo waa in si qoraal ah loogu soo gudbiyaa Gudiga maamulka ugu yaraan 15 cisho ka hor xilliga kulanka looga doodayo qodobada isbedelka.
4. Sharciga wax laga bedelayo waa in ay ogolaadaan 2/3 xubnaha xaqa u leh codeynta Kulanka Sanadlaha Ah ama Kulanka Gaarka Ah ee la isgu yeeray ujeedadaas.

## Cadeyn

Sharciyadan waxaa lagu soo bandhigay kulan ay si sharciga waafaqsan u qabteen Gudiga Maamulka ee Whittier Alliance oo intooda badan codkooda ka dhiibteen taarikhdu markii ay aheyd Oktoobar 22, 2020 oo ay xaqiijiyeen xubnaha ka qeyb qaatay kulanka markii ay taariikhdu aheyd Janawari 22, 2021.

Aldona Martinka — 1/22/21

Xogheynta — Taariikh

**Taariikhda Wax Ka Bedelka**
La ogolaaday Maarso 30, 1995
Wax laga bedelay & La ogolaaday Nofeembar 29, 2001
Wax laga bedelay & La ogolaaday Maarso 30, 2006
Wax laga bedelay & La ogolaaday January 12, 2015
Wax laga bedelay & La ogolaaday Janawari 22, 2021

## JAANTUS


I. HAY'ADDA 1

A. Xubnaha Ay Ka Kooban Tahay Hay'Adda 1

B. Xaafadda Whittier 1

XIII. II. QODOBKA UJEEDADA IYO ARAGTIDA 1

III. XUBNIMADA 1

A. Xuquuqda Xubnaha 1

B. Shuruudaha Xubin Ka Noqoshada 1

C. Tirada Cod Dhiibashada 1

D. Abuuritaanka Shuruudaha Cod Dhiibashada Xubnaha 2

E. Xilliga 2

F. Xubnaha Degganayaasha 2

G. Mulkiilayaasha Guryaha 2

H. Mulkiilayaasha Ganacsiga 3

I. Diiwaanka Xubnaha Cod Dhiibashada 3

J. Xafladda Codeynta 3

K. Xubinimada Ma Aha Mid La Wareejin Karo 4

L. Lacagta Xubinimada 4

M. Ka Noqoshada Xubinimada 4

IV. KULANKA XUBNAHA 4

A. Is Diiwaan gelinta Xubnaha 4

B. Noocyada Kulanka Xubnaha 4

C. Ogeysiiska Xubnaha 5

D. Goobta Iyo Habka Kulanka Xubnaha 5

E. Nidaamka Gudiyada & Kulanka Gaarka Ah ee xubnaha 5

F. Nidaamka Cabashada Xubnaha 5

V. GUDIGA MAAMULKA 5

A. Haesha Gudiga Maamulka 5

B. Awoodaha Guud 6

C. Shuruurdaha Xubnaha 6

D. Tirada Iyo Xubnaha Uu Ka Kooban Yahay 7

E. Mudada Gudiga 7

F. Doorashada Gudiga 7

G. Xubnaha uu Ka kooban yahay 8

H. Xil Ka Qaadista Xubnaha Maamulka 8

I. Is Casilaadda Gudiga 9

J. Jagoioyinka Banaan Ee Gudiga 9

VI. KULANKA GUDIGA MAAMULKA 10

A. Kulanka caadiga Ah 10
B. Kulanka Sanadlaha ee Gudiga Maamulka 10
C. Kualnka Gaarka Ee Gudiga Maamulka 10
D. Ogeysiiska Gudiga 10
E. Tirada La Doonayo & Cod Dhiibashada 10
F. Ka Qeybgalka Kulanka Iyada Oo Meel Fog La Kala Joogo 11
G. Ka Qeyb Galka oard Written Action Without a Meeting 11

VII. SARAAKIISHA GUDIGA MAAMULKA 11

A. Saraakiisha 11
B. Doorashada & Mudada Saraakiisha 11
C. Shaqo Ka Saaridda Saraakiisha 11
D. Jagooyinka Banaan Ee Saraakiisha 11

VIII. GUDIYADA MAAMULKA 11

A. Gudiga Fulinta 11
B. Gudiga Maaliya 12
C. Gudiyada Ku Meel Gaarka Ah 12
D. Guddi Hoosaadyada / Gudiyada Gaarka Ah 12

IX. NIDAAMKA MASLAXADAHA ISKA HOR IMANAYA 12
X. DIIWAANKA IYO BUUGAAGTA 12

A. Diiwaanada 12
B. Handti Dhawrka 12
C. Sanad Maaliyadeed 12

XI. HEYB SOOC 13
XII. WAX KA BEDELKA SHARCIYADA IYO QODOBADA 13

A. Wax Ka bedelka Talaabooyinka Gudiga 13
B. Wax Ka Bedelka Talaabooyinka Xubnaha 13